


Kani waa gobolka Sörmland!

Caafimaadka iyo daryeelka, basaska iyo tareenada, dhaqanka, dugsiyada waxbarashada dadweynaha iyo horumarka gobolka. Gobolka Sörmland ayaa mas'ul ka ah arrimo badan oo waaweyn oo muhiim ah, kuwaas oo ah arrimo badan oo waaweyn oo muhiim ah oo suurtagal ah in saamayn lagu samaynkaro sababtoo ah gobolka ayaa siyaasad ahaan gacanta ku haya oo hogaamiya.

Halkan hoose waxaanu ku sharaxaynaa macnaha iyo sida aad samaynayso si aad uga qaybqaadato oo aad saamayn ugu yeelato jihataynta Gobolka Sörmland afarta sano ee soo socota. Doorashadu waa 11ka Sebtembar.



Maxay go'aamiyaan golaha hogaamiyeyaasha gobolku?

Golaha hogaamiyeyaasha gobolka Sörmland waa xubinta iska leh go'aan qaadashada ugu saraysa waxayna ka kooban yihiin siyaasiyiin aad adigu qayb ka tahay oo aad dooranayso. Taas oo noqonayso haddii aad codeyso. Sidee loo isticmaalayaa lacagteena cashuurta ee guud, maxaa mudnaanaha koowaad la siinayaa maxaase aan la qabanayn? Siyaasiyiinta la doortay ayaa saameyn weyn ku leh sida loo maamulayo loogana hawl geleyo howlaha gobolka.

Daryeelka caafimaadku waa qayb muhiim ah oo ka mid ah waxqabadyada gobolka waana wax ay dhammaan dadka reer Sörmland ay ugu yaraa xiriir la sameeyaan halmar uun. Laakiin gobolka ayaa sidoo kale mas'ul ka ah horumarinta gobolka, gaadiidka iyo isgaarsiinta gudaha gobolka, iyo waxyaabo kale iyada oo loo marayo mas'uuliyiinta gaadiidka dadweynaha, iyo sidoo kale hawlaha dhaqanka ee gobolka.

Waa maxay sababta aan u codaynayaa?

- Doorashada gobolka waxaad saameyn ku yeelanaysaa arrimaha kugu dhow iyo go'aamada ka soo baxa meesha aad ku nooshahay. Intaa waxaa dheer, arrimaha maalinlaha ah ee qof walba uu xiriir la leeyahay, sida daryeelka caafimaadka iyo gaadiidka dadweynaha. Sidaa darteed, waa muhiim inaad isticmaasho xaqaaga codbixinta oo aad ka qayb qaadato oo saamayn ku yeelato, ayay tiri Eva Andrén oo ah madaxa istiraatiijiyadda ee shaqaalaha agaasimaha gobolka.

Miyaad waxkale isweudiinaysaa?

Ka akhriso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan doorashada gobolka 2022:

<https://regionsormland.se/val22>

Ka akhriso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan dimoqraadiyada gobolka:

<https://regionsormland.se/demokrati-insyn/>

Ka akhriso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan hanka iyo meesha aad ka codaynayso: <https://www.val.se/>